

Fahamka Baaritaanka Aqris-qorista: Waalidiinta iyo Qoysaska

Laga bilaabo sanad dugsiyeedka 2021-22, degmo dugsiyeed kasta ayaa ka baari doonta ardayda Fasalada Xanaanada illaa 2aad wixii daciifnimo ah ee ku saabsan horumarinta xirfadda akhris-qorista oo lala xiriirin karo dhibaataada qax aqriska.



Waa maxay Baaritaanka Aqris-qorista?

Baaritaanka Aqoonta waa:

- Tijaabo gaaban, oo aan rasmi ahayn oo la mariyo dhamaan ardayda si loo ogaado hadii baaritaan dheeraad ah loo baahan yahay.
- Ma ahan qiimayn rasmi ah oo lagu ogaanayo caqabadaha waxbarashada.



Maxaa Loo Baarayaa Canugayga?

- Wax ka qabadka hore ee daran ee lagaga jawaabay caqabadaha akhriska ayaa ah qaabka ugu wanaagsan ee looga hortagi karo mushkiladaha kahor inta aysan aad u adkaanin mudo kadib.
- Marka la helo aqoonsiga hore iyo wax ka qabadka mudada hore, ardayda ku jirta khatar mushkilada akhriska, oo ay ku jirto dhibaataada wax aqriska, waxa ay si guul leh u dhamaysan karaan waxbarshada iyo qalinjabinta kuuliyada, mihnada iyo nolosha madaniga ah.



Yaa Maamulaya Baaritaanka?

- Ardayda waa inay baaraan macalimiinta fasalkooda. Caruurta waxay qabtaan shaqada ugu wanaagsan marka la dejiyo oo ay dareemaan ammaan ee ay la joogaan qof wayn oo ay garanaayn.
- Macluumaadka ay macalimiintu ku ogaatay baaritaanka waxa ay ka caawin doontaa samaynta qorshaha tilmaamaha iyo in lagu ogaado marka caawimaad dheeraadka ah loo baahan yahay.



Xirfadahee Loo Baahan Yahay In La Baaro?

Dhibaataada Wax Aqriska waa ay ku kala duwan yihiin canug kasta iyo da'da iyo heerarka. Waxaa caam ah in dadka qaba dhibaataada wax aqriska ay ku adkaato inay ku dhawaaqaan kalmadaha laba ama wax ka badan oo dhawaaq ah leh, iyo sidoo kale:

- *Garashada Dhawaaqa*: awooda maqalka, aqoonta, masixida iyo isbadalka codadka kalmadaha lagu hadlay
- *Garashada Qaabka Dhawaaqa* ogaanshaha codka hadalka sida laxanka, xarfaha isku midka ah (kalmadaha ku bilaabma isku cod), tirada kalmadaha ee weedha ku jira, iyo dhawaaqa kalmadaha dhaxdooda.
- *Aqoonta Dhawaaqa Xarfaha*: aqoonta codadka matalaya xarfaha aflibeetada. Waxaa sidoo kale taas ka mid ah isku darka xarfaha matalaya codka hadalka.
- [Magacaabista Tooska ah ee Degdega ah \(Rapid Automated Naming, RAN\)](#): awooda sida dhakhsaha ah loogu magacaabo iyada oo lagu dhawaaqayo shayo isku mid ah. Waxaa taas kamid ah xarfaha, tirooyinka, midabada, iyo shayada ku jira fasalka.



Waa maxay Hanaanka Baaritaanka?

Wada shaqaynta qoyska/dugsiga waxay daruuri u tahay guusha aradayga. Talaabada kowaad ee marka aad ka walaacsan tahay hormarka ilmahoodu waa in ballan la qabsado si looga la hadlo maclinka:

- Dugsiyadu waa inay ka baaraan "Aqoonta Dhawaqa, Aqoonta Qaabka Dhawaqa, iyo Aqoonta Codka Xarfaha ardayda ugu yaraan hal mar sanadkii.
 - Xanaanada Caruurta: Janaayo
 - Fasalka Koowaad iyo Labaad: Dayrta
- Ardayda is qorta bartamaha sanadka waa in lala baaraa asaagood taariikhda baaritaanka ee xigta.
- Dugsiyada waa inay baaraan Xirfadaha Magacaabista Tooska ee Degdega ah ee Dugsiga Xanaanada iyo fasalka 1aad.
- Ardayda lagu arko inay aag ka liitado baadhitaanka hore waxaa lasiin doonaa wax ka qabad oo hormarkooda ayaa lala socon doonaa.
- Macalimiinta bixiya baadhitaanka waxaa lagu tobobari doonaa isticmaalka agabka baadhitaanka taas oo ku salaysan talooyinka daabacaha.
- Qoysasku waxay ka qayb geli doonaan go'aan gaadhista iyo cusboonaysiinta macluumaadka waxqabadka ardayga.



Fahamka Dhibaata Wax Aqriska:

- Farqiga ka dhigaya ka shaqeynta dhawaaqa hadalka mid adag, gaar ahaan awoodda maqalka, beddelka, iyo beddelka dhawaaqyada shaqsiyeed ee ereyada
- Waxaa lagu sifeeyaa inay tahay caqabad akhriska ah iyo higaada ah, gaar ahaan marka lala xidhiidhiyo xarfaha iyo codadka inta u dhaxaysa.
- Waxay u badan tahay inay horseedo mushkilado waxbarashada iyo xasuusashada kalmadaha, fahanka waxa la akhriyay, in la fahmo fikradaha warqad ku qoran.
- Lama xidhiidho garaadka guud.
- Ma ahan dhibaato aragga ah ama ay sabab u tahay dhiirrigelin la'aan, danayn, ama u soo dhowaansho suugaan hodan ah.

FIIDYAW: [*What is Dyslexia/Dyslexia Explained \(Waa maxay Dhibaata Wax Aqriska/Sharaxa Dhibaata Wax Aqriska\)*](#) oo ay qortay Margie Gillis oo la shaqaysa Understood.org

ILAHA

- [Bogga Dhibaata Wax Aqriska ee Xafiiska Kormeeraha guud ee waxbarashada dadweynaha \(Office of Superintendent of Public Instruction, OSPI\)](#)
- [Bogga Nidaam Taageero oo Heerar Badan Leh \(Multi-Tiered System of Support, MTSS\) ee OSPI](#)
- [Su'aalaha Soo Noq-noqda Doc](#)
- [Dalab Hawlaha Ugu Wanaagsan ee OSPI Farshaxanka Luuqada Ingiriiska \(English Language Arts, ELA\)](#)
- [Qalabka Golaha Qaranka ee Noloshu Madaxa Bannaan \(National Council on Independent Living, NCIL\)](#)
- [Xarunta WA ee Ururka Caalamiga ah ee Dhibaata Wax Aqriska \(International Dyslexia Association\)](#)